

Sharciga 3 Maarso 1970, lamba. 12.

Hakinta Ku meelgaarka ee Xaq Habeas Corpus

GOLAHA SARE KACAANKA

Marka uu arkay Xaashida Koowaad Kacaanka;
Marka uu arkay Xeerka lamba. 1. Ee 21 Oktoobar 1969;
Marka uu tixgaliyay baahida loo qabo in si ku meelgaara loo joojiyo xaq Habeas Corpus si loo xaqiijiyo in eedaysanayaasha loo horgeeyo Maxkamadda Badbaadada Dalka.
Iyadoo la qabanayo xilka Xeer-dejinta;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Qod. 66 ee XHCS waxaa la hakiyay muddo sanad ah, dambiyada ay iqtisaaskeeda leedahay Maxkamadda Badbaadada Dalka.

Qod. 2

Waa wax kama jiraan qaraar kasta hore ee Habeas Corpus dambiyada iqtisaaskooda ay leedahay Maxkamadda Badbaadada.

Qod. 3

Xeerkaanu wuxuu dhaqangalayaa 21 Oktoobar 1967.

Muqdisho, 2 Maarso 1970

Guddoomiyaha

Golaha Sare Kacaanka

S. Gaas Maxamed Siyaad Barre